Seattle Department of Transportation

# Xoojinta Sawirka Buundada Galbeedka Seattle oo Bilaabaneysa Janaayo 11, 2021 si Mudnaanta loo Siiyo Baabuurta Gargaarka Deg-Degga, Basaska, iyo Xamuulka

## Nidaam Xoojin cusub wuxuu milkiilayaasha baabuurta aan oggolaanshaha heysan u dirayaa 75 doolar ganaax mar kasta ay maraan

westseattlebridge@seattle.gov 206-400-7511

Iyadoo Buundada Sare ee Galbeedka Seattle loo xiray badbaadinta dadweynaha, Buundada Hoose Seattle (oo sidoo kale loogu yeero Buundada Waddada Spokane) waxey noqotay jid si aad muhiim ugu ah gawaarida gargaarka deg-degga ah, basaska, iyo kuwa xaamuulka culus si ay u tagaan ugana soo noqdaan Galbeedka Seattle. Si marinkan aadka muhiimka u ah ugu sahlanaado safarradaasi asaasiga ah, baabuurta kale waxa suurto gal ah ineysan ku socon karin Buundada Hoose inta u dhaxeysa 5ta subax ilaa 9 galab. Ka bilaabata Janaayo 11, 2021, Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) waxey ka shaqeysiin doontaa nidaam sawir-qaadis ootomaatik ah oo siin doona ganaax 75 doolar ah milkiilayaasha baabuurta aan oggolaansho heysan oo lagu sawiro iyagoo gooshaya Buundada Hoose halkii jahaba.

Sharciga baabuurta isticmaali karta Buundada Hoose isma beddelayo:

- Baabuurta kaliya ee loo oggol yahay isticmaalka Buundada Hoose ka bilaabata 5ta subax ilaa 9ka habeenimo waa gawaaridda deg-degga, basaska, basaska shaqaalaha, faananka la isla raaco, xamuulka, iyo kuwo hore oggolaansho loogu siiyey.
- Dadka wata baaskiillada, mooto, bas, ama lugeeya way sii isticmaali karaan Buundada Hoose waqti kasta.
- Dhammaan baabuurta kale (oo ay ku jiraan baabuurta qof ahaanta loo leeyahay, mootooyinka, tagaasida, iyo baabuurta aabka lagu raaco sida Uber iyo Lyft) lagama yaabo iney isticmaalaan Buundada Hoose laga bilaabo 5ta subax ilaa 9 habeenkii waxana loo dirayaa 75 doolar oo ganaax ah.
- Qof kasta wuu ku dul wadan karaa Buundada Hoose habeenkii oo idil laga bilaabo 9ka habeen ilaa 5ta subax. Wax ganaax ah lama bixinayo waqtiyadaasi.

Adkeynta maridda Buundada Hoose waxey muhiim u tahay in jidka loo firaaqeeyo baabuurta lagama maarmaanka ah ee rukhsadda u heysta, iyo gaar ahaan baabuurta gar-gaarka deg-degga ah si ay u tagaan cisbitaallada. Buundada Hoose waa hal leen dhinaciiba firaaqona uma heyso iney qaaddo dhammaan baabuurtii ku safri jirtay toddobada leen ee Buundada Sare. Haddii aaney jirin adkeyn, waxay abuuri kartaa ciriiri baabuurtu sanka isku hayaan iyo safaf dheer.

Waddooyinka kale ee u furan dadka aan ku wadi karin Buundada Hoose waxa ka mida Buundada 1st Ave South ama South Park Bridge. SDOT waxey sii wadi doontaa gacan siinta dadku u safraya ama ka imanaya Galbeedka Seattle. Waxan barnaamijkeena [Dib Ugu Xiranka Galbeedka Seattle], kula shaqeyn doonnaa bulshooyinka u dhow-dhow si mudnaanta loo siiyo mashaariicda yareyn doona saameynta saa'idka ee ka dhalatay baabuurta ku leexatay; mudnaan la siiyo isku xirka goobaha basaska ee aada ama ka yimaada Galbeedka Seattle; in la dhiso mashaariic cusub oo baaskiillada ah; iyo in la abuuro lana hagaajiyo marinno lagu leexdo. Dadku waxey sidoo kale gacan ka heli karaan raadinta siyaabo kale oo ay ku safri karaan [Portal-ka Safarrada Habboon ee Galbeedka Seattle iyo Dooxada Duwamish.]

Nidaamka xoojinta sawirka wuxuu u shaqeyn doonaa sida kaamerooyinka jidadka ee meelaha kale ee Seattle kuwaasi oo tigidho ku bixiya ku xad-gudubka nalalka gaduudan ama xawaareynta soonayaasha amniga iskuullada. Nidaamku wuxuu sawirro ka qaadi doonaa taargada leysinka marka ay maraan Buundada Hoose. Tani waxa lala barbar dhigi doonaa lambarrada leysinnada taargooyinka fasax heysta, iyo haddii baabuurku oggolaansho u heysan inuu ku safro buundada hoose ka dib waxa milkiilaha gaariga boostada loogu dirayaa 75 doolar oo ganaax ah cinwaanka ku diiwan gashan gaariga.

Nidaamka xoojinta sawir-qaadista wuxuu leeyahay faa'iidooyin iyo waxtar badan. Tani waxey la macno tahay boolis kooban oo goobta jooga iyo inaan baabuurta qof ahaan loo joojinin, si boolisku diiradda u saaraan baahiyada kale ee amniga bulshada. Waxey sidoo kale ka dhigeysaa sharci xoojinta mid is waafaqsan oo isku mida, iyadoo meesha ka saareysa qiyaasta aragtida ku dhisan ee ku saabsan qofkeebaa oggolaansho u heysta ama u heysan isticmaalka Buundada Hoose. Waxa ugu sii muhiimsan, nidaamku wuxuu gacan ka geysan doonaa ka joojinta khaa'imiinta isticmaalka buundada si baabuurta emerjensiga, xamuulka, iyo basaska si nabad ah oo waxtar leh ugu safri karaan.

Si loo ilaaliyo arrimaha gaarka ah, kaamerooyinka waxa kaliya ay duubi doonaan taargooyinka baabuurta ee ma aha dadka gudaha gaariga ku jira. Sawirrada waxa kaliya loogu talo galay in loo isticmaalo xoojinta meelaha la mamnuucay ee dusha Buundada Hoose, mana loogu talo gelin xoojinta sharciyada falal kale.

Baabuurta emerjensiga, basaska, iyo kuwa xamuulka si ootomaatik ah ayaa loogu oggol yahay iney isticmaalaan Buundada Hoose mana la siin doono ganaax. Tiro yar oo koooban oo ka mida kuwa xeebaha, dowladda, iyo gaadiidka ganacsatada Galbeedka Seattle oo ku gudo jira howlo deg-deg ah ayaa hore oggolaansho loogu siiyey isticmaalka buundada. SDOT waxey la shaqeysay hey'adahaasi si lambarrada taargooyinkooda nidaamka loogu diiwaan geliyo. Haddii aad aaminsan tahay inaad u qalanto in hore laguu siiyo isticmaalka iyadoo salka ku heysa tilmaamaha kor ku xusan, fadlan usoo iimeel garee westseattlebridge@seattle.gov ama wac 206-400-7511.

SDOT waxey indhaha ku heyn doontaa mugga baabuurta Buundada Hoose horraanta 2021 ka dib marka la shaqo geliyo nidaam cusub. Haddii macluumaadka baabuurta ina tusto iney jirto firaaqo lagu kordhin aro maritaanka, waxanu la shaqeyn doonnaa Guddiga Howlaha ee Buundada Galbeedka Seattle si ay uga talo bixiyaan hab isu dheelli tiran ee maritaanka Buundada Hoose.

*****

## S&J inta badan la iska weydiiyo Xoojinta sawir-qaadista Buundada Hoose ee Galbeedka Seattle

### Intee bay qaadaneysaa inaad hesho ogeysiis ganaaxa ah?

Milkiilaha ku diiwan gashan gaari aan oggolaansho heysan wuxuu ku helayaa ogeysiin ganaax boostada muddo 14 cisho gudahood ah. Ganaaxyada waxa lagu bixin karaa labad jihaba ee ku socodka buundada. Haddii xad-gudubku dhacay adigoo wada gaari kiro ah, waqtiga intaa wuu ka badnaan karaa. Shirkadda gaariga kireysay waxey heysataa fursad ay ku caddeyso wadihii gaariga soona gudbiso warbixinta si ogeysiin boostada loogu diro kireystihii baabuurka.

Maxkamadda Munashiibiyada Seattle waxey bixineysaa kala doorasho sida adeeg bulsho oo u dhiganta bixinta qarashka iyo qorshe bixinta lacagta oo wax dulsaar ah laheyn si looga yareeyo culeyska dhaqaale dadka u qalma. Haddii aad hesho ogeysiin ganaax, waxad heysataa 18 cisho ood ku bixiso.

### Sidee baan ku bixin karaa ganaax?

Haddii aad hesho ogeysiin ganaax, waxad heysataa 18 maalmood ood ku bixiso. Waxad leedahay seddex hab ood ku bixiso:

1. U dir jeeg ama money order khasnadaha U.S., ee la siin karo Seattle Municipal Court, oo lacagta hore ka muuqata ah, maalinta ama ka hor taariikhda loo baahan yahay. Fadlan lacag bixinta soo raaci kuubaanka ku lifaaqan. Ku qor lambarka Notice # iyo lambarka leysinka taargadaada jeegaaga ama money order. FADLAN KAASH HA KU SOO DIRIN BOOSTADA.
2. Ku bixi internetka, maalinta ama ka hor taariikhda www.seattle.gov/courts/ticketinformation.htm ama ku bixi nidaamka la ootomaatik gareeyey oo laga heli karo telefoon kasta oo taabashada touch-tone leh (206) 233-7000.
3. Qof ahaan u bixi, maalinta ama ka hor taariikhda, Isniin ilaa Friday, 8da Subax ilaa 5ta Galab Xafiiska Court Payment Office oo ku yaal doorka 1aad ee Dhismaha Maxkamadda Seattle Municipal Court, 600 Fifth Avenue, Seattle, WA. Sanduuq bixinta ah wuxuu ku yaallaa dhismaha Seattle Municipal Court hortiiisa saacadaha shaqo ka bacdi si sahlan.

### Sidee baan uga doodi karaa ganaaxa?

Isticmaal kuubaanka ood soo raacineyso codsigaaga si aad ku weydiisaneyso dhageysi in lagaa fududeeyo ama dhageysi aad kaga murmeyso. Si aad u soo gudbiso caddeyn inaad ka masuul aheyn, raac tilmaamaha ku qoran ganaaxa.

- DHAGEYSI AAD KU FASIREYSO XAALADAHA: Weydiisashada dhageysi khafiifin ah, waxa laguu arkayaa inaad gashay qaladka. Ma keeni kartid marqaati dhageysigani. Waxad weydiisan kartaa dhageysi in la khafiifiyo haddii aad oggoshahay inaad gashay qaladka laakinse aad aaminsan tahay in xaaladuhu ay suurto-gal ka dhagiyaan in maxkamaddu iney yareyn karto ama tuuri karto ganaaxa.
- DHAGEYSI AAD KAGA MURMEYSO GANAAXA: Dhageysi laga murmayo Magaaladu waxey leedahay culeys ay ku caddeyneyso marqaatiyaha in dambiyada la galay.

Waxad u yeeran kartaa marqaati uu ku jiro askariga bixiyey Ogeysiintan Ganaaxa ah. Haddii aad codsato dhageysi aad kaga murmeyso Maxkamaddu waxey dhigeysaa ballan hore oo shir dhageysi ah, oo aad laali karto adigoo isticmaalaya foomka ku lifaaqan Ogeysiinta Dhageysiga (Notice of Hearing) kaasi oo maxkamaddu kuu soo diri doonto.

- SOO GUDBI CADDEYN INAAD MASUULIYAD KU LAHEYN: Haddii gaarigaaga la xaday, ama la iibiyey ka hor taariikhda xad-gudubka la galay, ama uusan gacantaada ku jirin, ama aad heynin ama waqtiga qaladka la galayo, waxaad soo gudbin kartaa hadal dhaar ah taasi oo taabaneysa in Maxkamadda kaga hortagto aaminsanaanta, ku asteysan SMC 11.31.090, oo sheegaya inaad gaariga wadday waqtiga xad-gudubka la galay.

**Ma arki karaa caddeyn inaan si sharci darro ah uga gudbay Buundada Hoose?**

Waxad ka eegi kartaa muuqaallo sawirro ah iyo fiidiyow online-ka www.ViolationInfo.com. Waa inaad isticmaashaa Lambarka Ogeysiinta (Notice #) iyo biin (PIN) ku daabacan bogga hore ee ogeysiiska si aad login ugu sameyso.

Dadka aan heli karin kombiyuutar waxey booqan karaan Qeybta Seattle Public Library ama Maxkamadda Municipal Court (600 Fifth Avenue) si ay u arkaan caddeyn sawirka iyo fiidiyow ah.

**Maxaa ku dhacaya leysinkeyga ama insuuransigeyga haddii aan bixiyo ganaaxa ama la igu helo dambi maxkadda?**

Xad-gudubyada xoojinta sawirka waxa lagula macaamilaa sida dambiyada baarkinka. Ma jiraan xaalado ku taxaluqa leysinkaaga, dhibco la qiimeynayo, iyo saameyn ay ku yeelaneyso inshuuranisgaaga.

**Waxan dareen ka qabaa arrimaheyga shaqsiga ah. Maxaa dhacaya ka dib marka kaameradda sawir ka qaaddo gaarigeyga? Qof kasta ma arki karaa muuqaalka?**

Si loo difaaco shaqsigaaga, kaameradda waxa kaliya ay duubeysaa lambarka taargada ee ma aha dadka ku jira gaariga. Sawirrada waxa kaliya loogu talo galay in loo isticmaalo xoojinta meelaha la xadiday ee dusha Buundada Hoose, mana loogu talo galin falalka kale ee xoojinta sharciga.

Nidaamka wuxuu intaa ka dib isku eegayaa lambarrada taargooyinkaa oo saldhig u tahay macluumaadka kuwa loo oggol yahay isticmaalka si loo ogaado in gaarigu u heysto oggolaansho inuu isticmaalo Buundada Hoose xilligaa. Waaxda Booliska Seattle saraakiishooda waxey eegayaan muuqaallada suurto galka ee xad-gudub kasta inta aaney dirin ogeysiin ganaax. Gawaarida aan loo oggolaan waxey helayaan 75 doolar oo ganaax ah mar kasta ay socod ku maraan Buundada Hoose.